



LA-TALIN CAAFIMAAD

Ee Beddelka Khadka Adeegga Leedh

Khadka adeegga biyaha ee gurigaaga dhawaan ayaa lagu beddelay beebka kobar. Markii la saaray khadadkii adeegga leedh, leedh waxay ku sii hadhi kartaa gudaha beebka dhowr usbuuc ilaa dhowr bilood.

Leedh waxyeello ayay keeni kara. Waxay:



Saamaysa koboca jidhka iyo maskaxda ee caadig ah ee dhallanka iyo carruurta




Sababtaa cillado xagga feejignaanta, maqalka, iyo awoodaha barashada carruurta ah



Kordhisaa cadaadiska dhiigga ee dadka

TALLAABOOYIN LAGU YARAYN KARO SOO-GAADHISTA LEEDH BIYAHU LA CABBO




Guriga oo Dhan Biyo Raacid

Marka adeegga la beddelo oo adeegga biyaha lagu soo celiyo gurigaaga, fur tuubooyinka guriga oo dhan adigoo isticmaalaya biyo qabow. Ku bilow tuubada heerka ugu hooseeya ilaa heerka ugu sarreeya. Habkani wuxuu nadiifin doonaa dhammaan beebabka biyaha ee dhismaha. 30 daqiico kadib markaad biyaha ku shubto, xidh tuubooyinka ka bilaabma heerka ugu hooseeya oo kor u kac. Nadiifi hawo mareenada kadib markaad dhammayso dhaqidda guriga oo dhan.

Nadiifi Hawo-qaadayaasha

Ka saar hawo-qaadayaasha tuubada/madaxa qubayska oo ka nadiifi wixii walxo ah ee meeshas ku ururay.



Isticmaal Weelka Shaandhada ah


axaan ku siinaynaa weelka biyaha shaandheeyaa. Isticmaalka weelkan waxay kaa caawin doontaa in meesha laga saaro wax kasta oo qurubka leedh ah ee aan lagu saarin dhaqidda guriga oo dhan. Biyaha loo isticmaalo cabitaanka ama wax karinta waa in la sifeeyaa. Biyaha loo isticmaalo maydhashada ama dharka lagu dhaqo uma baahna in la sifeeyo.

- Shaandhada wexey faa'iido leedahay muddo lix bilood ah. Haddii aad dooneyso in aad sii isticmaasho weelka shaandhada isagana wixii ka badan lix bilood, fadlan raac warqadda soo saaraha sida loo beddelo shaandhada.
- U isticmaalka saxda ah qalabkan biyaha la cabbo waxay kaa caawin doontaa xaddidaada soo-gaadhistaa leedh. Tani waxay si gaar ah muhiim u tahay haddii aad leedahay uur ama aad leedahay carruur yaryar.



Sii Muunad La Socosho ah

Waxaanu ku siin doonaa baadhitaan la socosho ah 3-6 bilood kadib beddelka adeegaaga biyaha ee leedh. Tani waxay hubin doontaa inaysan jirin ilo kale oo muhiim ah oo ku jira biyaha tuubadaada. Xubin ka tirsan kooxda SPRWS Free Lead ayaa kula dubaridi doonaa baaritaanka la socoshada.



Biyo ku dhaqid joogto ah

30 maalmood kadib marka khadka adeegga la beddelo, biyo qabow dhexta mari tuubooyinka gurigaaga 5 daqiico subax kasta (ama muddo dheer oo biyo la'aan ah kadib) kahor intaadan cabbin ama wax ku kardin. Shaawarka ama qubayska wuxuu ku nadiifin doonaa khadkaaga habkan.

Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan macdanta rasaasta iyo biyaha la cabbo, barnaamijka "Lead Free SPRWS" ee beddelka khadka adeegga, ama si loo xaqijiyo alaabtaada adeegga, boqo stpaul.gov/water/lead-free

Kooxda "Lead Free SPRWS" waxay diyaar u yihiin su'alaha guud ee email-ka lead@stpaul.gov ama taleefoonka 651-266-6820.